Jawaabta caymiska ee caymiska shilalka

Loogu talogalay carruurta iyo dhalinyarada ku sugan Göteborgs Stad, laga soo bilaabo **2019-07-01 – 2020-06-30**

Degmadu waxay caymiska shilalka gelisay ardayda, carruurta, dhalinyarada iyo kooxo kale oo ka tirsan hawlaha hoostaga Göteborgs Stad. Jawaabta caymiska waxay sharraxaad kooban ka bixinaysaa baaxadda caymiska. Waxaa markasta la hirgeliyaa shuruudaha caymiska oo dhamaystiran markii dhaawac sharciyan loo maaraynayo.

Dhaawac shileed waa dhaawac jireed oo qofka caymiska ku jira si aan ikhtiyaarkiisa ahayn usoo gaara oo dhacdo bannaanka uga timid kasoo gaaray (Waxyeelo jirka soo gaartay oo bannaanka uga timid). Caymisku ma quseeyo jirro.

Tillaabooyinka markii dhaawac jiro
• U tag dhakhtar ama dhakhtar ilko ku xiran qasnadda caymiska guud (Försäkringskassan)
• Kaydso dhammaan rasiidyada
• Haddii baahi loo qabo taksi iskuulka geeya oo kasoo qaada shilka dartiis waa in lagu caddeeyo caddayn dhaktareed. Caddaynta waa inay ku caddahay muddada taksiga loo oggolaaday. Inta aan la dalban safarrada taksiga ee lagu tagayo oo looga soo noqonayo iskuulka waa in Protector lala soo xiriiro si loo xaqiiqsado. Soo dir caddaynta marka aad dhaawaca nagu soo wargelinaysid adigoo u maraya bogga Protector ama email. Xaqiijinta kaga timid Protector kaddib waxaad dalban kartaa safarrada taksiga.
• Haddii dhaawac jiro waa khasab in Protector loo soo diro kusoo wargelin dhaawac ayadoo aysan jirin soo daahid aan munaasab ahayn.

Ciddee quseeyaa caymisku	Goormuu quseeyaa caymisku
Carruurta 0-17 sano - Carruurta ka qoran Göteborgs stad. - Carruurta ka ymid degmo kale oo dhigta dugsi xannaano oo degmadu leedahay ama gaar loo leeyahay iyo sidoo kale iskuulada degmada iyo kuwa madaxa bannaan ee ku yaal Göteborgs Stad. - Ilmaha magangalyo doonka ah – iyo ilmaha loo soo dacwooday iyo sidoo kale ilmaha dhuumashada ku jira ama aan sharci lahayn ee ku sugan Göteborgs Stad.	Xilli buuxa Maalintii oo dhan (24 saac) ha noqoto xilliga iskuulka, firaaqada iyo xilliga shaqada
Ardayda dugsiga sare laga soo bilaabo 18 sano - Ardayda dugsiga sare ee dhigta dugsi sare oo degmadu leedahay ama ka madax bannaan oo ay ka mid yihiin ardayda degmo kale ka tidmid - Ardayda dugsiga sare dhigta ee ka yimid Göteborgs Stad ee dhigta dugsiyo sare oo ku yaal degmo kale - Ilmaha magangalyo doonka ah iyo kuwa loo soo dacwooday iyo sidoo kale kuwa dhuumashada ku jira ama sharci la´aanta ah ee ku sugan Göteborgs Stad.	Xilli buuxa Maalintii oo dhan (24 saac) ha noqoto xilliga iskuulka, xilliga firaaqada iyo xilliga shaqada. Ardayda dhammaynaya waxbarashadooda caymisku wuu quseeyaa illaa laga gaarayo 1 sebtembar sannadkaas.
Kuwa kale ee Caymiska ku jira - Ka qaybgalayaasha waxbarashada degmada ee dadka waawayn iyo waxbarashada dadka waawayn ee baahida gaarka ah leh oo hoostagta Maamulka waxbarashada. Ka qaybgalayaasha ku guda jira tijaabin iyo kuwa haya hawl quusid ah iyo sidoo kale waxabarasho shaqo barasho goobta shaqada lagu qaadanayo, shaqo tabobar ah iyo shaqo mashruuc - Madax ka ah hawlo degmo oo aan ka tirsanayn LAF.	Xilliga hawlaha (shaqo), iyo sidoo kale inta toos loogu sii socdo ama laga soo socda hawshan (shaqo).
Qaybaha caymiska	**Cadadka lacageed ee caymiska**
Curyaanimo/dhaawac joogto ah (abadiyan)	15[1]Cadadka sicirka aasaasiga ah (15[1] prisbasbelopp[2)]
curyaamid dhaqaale ay keentay dhaawac hoos u dhigay karaanka shaqo ee qofka	15[1]Cadadka sicirka aasaasiga ah(15[1] prisbasbelopp[2)]
Kharashaada dhakhtar, dhaawac ilko iyo kharashaad safar	Cadad lacageed aan xaddaysnayn
Kharashaad dheeri ah	Lagama maarmaan iyo macquul ah
Kharashaadka qalab caawimeed	Lagama maarmaan iyo macquul ah
Daawayn dib usoo kabasho	Lagama maarmaan iyo macquul ah
Hanti shaqsiyadeed	Gaaraysa illaa 0,25 cadadka sicirka aasaasiga ah (prisbasbelopp[2)]
Xanfaf iyo xanuun	Magdhow la raacayo jaantuska
Magdhaw nabar	Magdhow la raacayo jaantuska
Magdhabid geeri (mag)	U dhigma cadadka sicirka aasaasiga ah 1(1 prisbasbelopp[2)]
Caymiska xasaradda	Gaaraysa illaa 10 daawayn caafimaad

[1] Markii ay timaado curyaamid dhaqaale (karaanka shaqo oo hoos u dhacay) oo ugu yaraan 50% ah, magdhowga waxaa lagu salaynayaa 30 sicirka sannadka aasaasiga ah (30 prisbasbelopp[2).]
[2] Cadadka sicirka aasaasiga ah waa 46 500 kronor 2019

Wakhtiga hawlaha shaqo/ wakhtiga uu joogay/ xilliga iskuulka

Caymisku wuxuu quseeyaa wakhtiga caadiyan iskuulka lagu jiro, xiisad iyo biririf ama wax u dhigma iyo sidoo kale safarka sii socodka iyo soo socodka. Caymisku wuxuu quseeyaa waxyaalaha kale ee aw soo qabanqaabiyo iskuulku sida PRAO, APU, iyo xlliyada shaqooyinka tabobarka ah ee ka mid ah manhajka waxbarashada (xattaa wakhtiga ardaygu joogo goob shaqo oo qayb ka ah waxbarasho u socota) hawlaha iskuulka xilliga fasaxa, isboorti, tamashlayn u bixid, booqasho waxbarasho, safarrada iskuulka iyo wixii kale ee lasoo qabanqaabiyo oo uu oggolaado maamulaha ama cid u dhiganta.

Xilli buuxa
xilliga iskuulka, xilliga firaaqada iyo sidoo kale fasaxyada.

Kharashaadka daawayn
Caymisku wuxuu bixiyaa magdhow wixii lagama maarmaan ah iyo kharashaad macquul ah oo ku baxay daryeel dhakhtareed, daawo, daawayn, iyo qalab caawimaad si dhaawacu u buskoodu. Kharashaadku waa inay dhasheen shan sano gudohood laga soo bilaabo markii dhaawacu dhacay.

Magdhowga waxaa la bixiyaa sidoo kale haddii isbitaalka qofka lagu daryeelo. Kharashaadka la magdhabayo waa daryeel caafimaad oo ka mid ah kuwa caymiska guud uu magdhabo ama hey´adaha dawladu bixiyaan keliya.

Kharashaadka safarka
Caymisku wuxuu bixiyaa kharashaadka safar ee loo galay si loo helo daryeel caafimaad iyo daawayn. Waxaa sidoo kale la bixiyaa safarka la raaco gaadiid u gaar ah si looga qaybqaato hawlaha iskuulka haddii dhakhtar kuu qoray. Kharashaadka waa inay dhasheen shan sano gudohood laga soo bilaabo markii dhaawacu dhacay. Kharashaadka safar ee la bixiyo (la magdhabo) wuxuu u dhigmaa khidmadda/ajuurada ugu sarraysa ee ku baxda safarrada jirro sida ku cad sharciga caymiska guud, waana in marka hore Protector oggolaato.

Kharashaadka dhaawaca ilkaha
Caymisku wuxuu bixiyaa (magdhabaa) kharashaadka lagama maarmaanka u ah daawaynta ilkaha ama ilko qofka loo geliyay oo afka gudihiisa dhaawac kusoo gaaray. Kharashaadka waa inay dhasheen shan sano gudohood laga soo bilaabo markii dhaawacu dhacay. Kharashaadka waa inay Protector oggolaato intaan daawaynta la bilaabin. Haddii ay khasab noqoto in daawaynta dib loo dhigo waa la bixin (magdhabi) karaa haddii qofka caymiska ku jira awsan 25 sano buuxin.

Dhar dhaawac soo gaaray iyo ookiyaalo
Haddii dhaawaca shilka keeno inay khasab noqoto in qofka caymiska ku jira dhakhar daaweeyo, waxaa la bixiyaa kharashaadka hantida (alaabaha) caadiyan jirka lagu xirto.

Kharashaad dheeri ah
Haddii shilku keenay daawayn dhakhtareed waxaa qofka caymiska ku jira laga bixiyaa kharashaadka dheeriga ah ee lagama maarmaanka ah iyo kharashaadka dheeriga ah ee aan la huri karin kuwaas oo dhaawaca shilka dartiis xilligii buskoodka degdegga ah gudihiisii dhashay.

Daawayn dib usoo kabasho
Magdhaw baa laga bixiyaa kharashaadka ka dhashay soo kabashada oo ka dhigan baaritaan, daawayn iyo daryeel caafimaad.

Qalab caawimaad farsamaysan
Haddii dhaawaca shilka ka dhashay la filayo inuu keeno curyaanimo waxaa la bixiyaa (magdhabaa) qalabka caawimaadda farsamaysan.

Magdhowga curyaanimada
Waxaa la magdhow laga bixin karaa curyaanimo xag caafimaad ama xag dhaqaale (mushaar) kasbasho. Qiimaynta ugu danbaysa waxaa la samayn karaa markii dhaawacii buskoodo oo dhakhtarku xaaladda ku qiimeeyo inay halkaas ku istaagtay. Waxaa la bixiyaa magdhow qayb wayn ka ah cadadka lacageed ee caymis oo u dhigma hadba heerka ay gaarsiisan tahay curyaanimadu.

Geeri
Aan loo eegayn waxa sababay, 0-25 sano. Haddii qofka caymiska ku jira uu dhinto ayadoo ay sababtay dhaawac shileed 3 sano gudohood laga soo bilaabo markii shilku dhacay ama wakhtigii caymiska gudihiisa ayadoo aan loo eegayn waxa sababay baa waxaa la bixiyaa magdhow loogu talogalay ka taakulayn aaska qofkaas dhintay ee caymiska ku jiray.

Guud

Lambarka heshiiska:	*366154-5.1*
Shuruudaha:	*Caymis shileed ka dhexeeya degmooyinka* PS210 GBG laga soo bilaabo 01.07.2018.
Kharashka caymiska qaybta qofku iska bixiyo:	*Caymisku ma lahan qayb la iska bixinayo kharashkeeda.*
Cadadka sicirka aasaasiga ah 2019:	46 500 kr
Jooga meel ka baxsan waddamada Iskandaneefiya:	*Caymiska ansax noqoshadiisu waxay ku egtahay ugu badnaan 12 bilood kaddib marka la joogo meel ka baxsan waddamada Iskandaneefiya.* Waxaa magdhow laga bixiyaa kharashaadka inta aan meel kale laga bixin karin.
Magdhow meel kale ka yimid:	*Magdhow lagama bixiyo kharashaadka ay cid kale bixiso ee aw dhigayo sharci ama dastuur u gaar ah, xeer caalami, heshiis wadareed ama hey´ad kale oo magdhow bixisa, oo loo isticmaali karo arrinkaas caymis.*
Kusoo wargelin dhaawac	Tel: +46 (0)8-410 637 27 Bogga: Kusoo wargelin dhaawac waxaa toos looga samayn karaa www.protectorforsakring.se E-mail: skador@protectorforsakring.se
	Waxaa kale oo loo diri karaa Protector Försäkring Västra Trädgårdsgatan 15 111 53 Stockholm

Casumaad ku saabsan diffaaac kasii fiican

Carruurtu waa waxaan haysano waxaan ugu jecel nahay. Sidaas oo ay tahay waxaan badanaa gaariga iyo guriga gelinaa caymis ka fiican kan carruurta. Waxaan kugu casumaynaa inaad ku kabtid caymiska shilalka ee Göteborgs Stads caymis magadhabaya xattaa haddii curyaanimo jirro[3] keentay kugu timaado .

Waxaa caadiyan curyaanimada sababa jirro

Caymiska ilmahaagu uga jiro Göteborgs Stad wuxuu quseeyaa oo keliya markii shil dhaco laakiin caadiyan waxaa curyaanimada sababa jirro ku timid ilmaha. Waxay tusaale ahaan noqon kartaa xanuun dheefsamaynta ku yimaada ama jirrooyin xubnaha dareemaha jirka ku dhaca.

Cadadka lacageed ee caymiska

Cadadka lacageed ee aasaasiga ah marka laga hadlayo curyaanimo waa 15 Cadadka sicirka aasaasiga ah (15 prisbasbelopp[2]).
Cadadka lacagta magdhowga ah ee ugu sarraysa waa 30 cadadka sicirka aasaasiga ah (30 prisbasbelopp).

Sidaan baa loo xisaabiyaa magdhowga marka laga hadlayo curyaanimo

- Heer curyaanimo caafimaad oo ka hooseeya boqolkiiba 50
  - Magdhowga waxaa lagu salaynayaa cadadka lacageed ee caymiska
- Heer curyaanimo caafimaad boqolkiiba 50 iyo wixii ka sarreeya
  - Magdhowga waxaa lagu salaynayaa cadadka lacageed ee caymiska oo 2 jibbaaran.
- Markii karaan darrada (tabar darrada) shaqo ee jirka si joogto ah boqolkiiba 50 noqdo waxaa la bixiyaa magdhow ah boqolkiiba 50 cadadka lacageed ee caymiska.
- Markii karaan darrada jirka si joogto ah uu boqolkiiba 75 noqdo waxaa la bixiyaa magadhow dhan boqolkiiba 75 cadadka lacageed ee caymiska.
- Markii karaan darrada jirka si joogto ah boqolkiiba 100 noqdo waxaa la bixiyaa magdhow dhan boqolkiiba 100 cadadka lacageed ee caymiska.

Qiime

Qiimaha caymiskan waa 351 kronor sannadkii.

Magdhowyada kale ee la bixin karo

- Kharashaad dhakhtar iyo safar xilliga jirrada
- Isbitaal gelid iyo magdhabid kharashaadka daryeel caafimaad degdegga ah
- Dib usoo kabasho iyo qalab caawimaad
- Kaalmo kharashaad
- Magdhow geeri (mag)

Caddayn caafimaad

Markii aad soo codsatid caymis jirro waxaan samaynanaa baaritaan caafimaad oo lagu qiimaynayo inaad wax khatar ugu jirtid. Jirrooyinka ilmahaaga horay u qabeen iyo jirrooyinka qaarkood oo laga reebay kuwa aan caymis la gelin karin. Mararka ugu badan ilmaha waa loo oggolaadaa caymis in la geliyo laakiin waxaan ka dhaafnaa mararka jirrooyin iyo dhib hore jireen markii aad caymiska soo codsanaysid. Sidaas darteed baan u baahanahay inaan wax badan ka oggaano ilmahaaga caafimaadkiisa. Markii aad buuxisid caddaynta caafimaadka waxaan helaynaa aqoon ku saabsan ilmahaaga oo keenaysa inaan qiimayno ku samayno caymiska aan kugu casumi karno.

[1] Qiimaha wuxuu quseeyaa caymiska la galo inta u dhexaysa 2019-07-01 iyo 2020-06-30
[2] Cadadka sicirka aasaasiga ah waa 46 500 kronor 2019
[3] Caymiska waxaa la geli karaa illaa laga gaarayo 18 sano

Wixii warbixin intaa dheer iyo sidoo kale iska qoridda
Adigoo ixtiraaman booqo boggeena **www.protectorforsakring.se/gbgstad**
ama wac 08-410 637 00 si caddaynta caafimaadka iyo foomka isqoridda boostada lagugu soo diro.

PROTECTOR försäkring